

# Adeegyada Gobolka ee Dadka Indhoolaha ah (SSB)

## WAXAY U BAAHAN YIHIIN INAY OGAADAAN ARDEYDA IYO QOYSASKA

### WAA MAXAY SSB?

Waxaan haynaa tasiilaad iyo tababar horseedi kara guul in laga gaaro iskuulka, nolosha iyo shaqada. Adeegyada gobolka oo dhan ee ardeyda

waa kuwa lagula shaqeynayo ardeyda indhoolaha ah, kuwa araggu ku yar yahay iyo indhoolaha

Dhegaha La'. Waxa kale oo aan tasiilaad u haynaa qoysaska iyo iskuullada.

Waxaan ardeyda ku caawin karaa in ay yeeshaan xirfado iyo khibrado ay ku heli karaan mustaqbal fiican.



### ● SIDEE BAAN KUU CAAWIN KARNAA?

Barnaamij la yiraahdo BRIDGE ayaan ku haynaa barashada Xirfadaha Aasaasiga ah, in lala kulmo Dad Lagu Daydo, in la xoojiyo Wax-raadiska, in lagu hawlgalo Xal-raadin, in la qorto Yoolal, iyo in la helo Khibrad. Gaar ahaan, waxaan ardeyda ku xirnaa goobo shaqo-barasho, soo-daawashada shaqada, iyo qorsheynta shaqooyin ah xirfad oo lagu shaqeysto mustaqbalka. Barnaamijyada waxaa lagu baranaya xirfadaha nolosha ee maalin kasta loo baahan yahay si uu qofku keligiis u noolaan karo, sida cunto-kariska, nadiifinta, meelo-aadid, isticmaalidda qalab nolosha caawimaad u ah iyo maareynata nolosha.



### ● LACAG MIYAA LA IGA RABAA?

Badanaaba wax lacag ah lagaama rabo. Waxyaabaha qaar sida lacagta kuleejka ama barnaamijyada kale ee gaarka ah, qoyska ayaa kharashka qaar laga rabaa balse dakhligooda ayaa loo tixgelinaya.

### ● SIDEE BAA WAX LOO SAMEYNAYAA?

Ardeyda iyo qoysaskooda ayaa waxay la kulmayaan mid ka mid ah lataliyeyaasha si ay ugala hadlaan yoolalka iyo qorsheyaasha mustaqbalka. Si wadajir ah ayaan isula meel dhigeynaa shuruudaha.



**Sidee Baan Ku Helayaa Faahfaahin?** La soo xiriir Isku-duwaha Hawlaha Xirfadaha, Shane DeSantis, 651-358-5205 ama [Shane.Desantis@state.mn.us](mailto:Shane.Desantis@state.mn.us)